Vestfold
FYLKESKOMMUNE

**Heshiis ku saabsan kirasashada bærbar PC/nettbrett iyo agab waxbarasho,buugag iyo qalab kale oo u dhexeeya**
**Gobolka Vestfold**
(Org.nr. 929882385)
iyo
(Magaca ardayga) - (taariikhda dhalashada)

# 1. Guud ahaan

## 1.1 u dhexaysa

Heshiiskan waxaa wada galay oo uu ka dhexayaa gobolka Vestfold iyo ardayga kiraystay bærbar-PC/nettbrett iyo amaahashada qalabka waxbarashada,buugaagta iyo agabka kale.

Hadii aanu ardaygu qaangaar ahayn, heshiiska waxaa lala gelayaa waalidka ardayga kaas oo ka masuul ah kiraysashada iyo amaahashada.

Markaan saxiixo waxaan xaqiijinayaa in aan akhriyey nuxurka dukumintiga oo aana aqbalay, oo ana aqbalay shuruudaha gobolka iyo hab raaca isticmaalka iyo sida ardaygu ula dhaqmayo PC/nettbrtett (Waxyaabha loo yaqaan qalabka kumbiyuutarka) kapitel 2. Qalabka waxbarashada,buugaagta iyo qalabka kale,kapitel 3. Saxiixidda iyo faktuurada (fakturering), kapitel 4.

Xiriirka kiraysiga ee ka dhexeeya degmada iyo ardayga waxaa nidaaminaya qodobada heshiiskan.

Heshiiskan waxaa lagu saxiixayaa si dijitaal ah halkan https://elevkontrakter.vtfk.no/

## 1.2. Xuquuqda hantida /xuquuqda isticmaalka

PC/qalabka waxbarshada/buugaagta sida heshiiska ku qoran waa hantida gobolka,ardigu wuxuu leeyahay oo kelya xuquuqda isticmaalida kumbiyuutarka.

## 2. Kiraysashada kumbiyuutarka (PC)

### 2.1. Qalabka kumbiyuutarka barogaraamada heshiisku daboolay

Nidaamka waxaa ka mid ah oo uu daboolayaa kumbiyuutar wata jaarjer iyo qalab kale oo dheeraad ah,hadii la wax yeeleeyo ama la lumiyo shuruudaha heshiisku wuxuu khuseeyaa sidoo kale kumbiyuutarka la amaahdo.

Borogaamadan soo socda ayaa lagu rakibayaa kaas oo ay weheliyaan nidaamka hawlgalka:

• Barnaamijka taageerida xafiiska ee **(**Microsoft Office 365) ee wax lagu qoro

• Barnaamijo kale oo iskoolku u isticmaalo waxbarashada

### 2.2. Isticmaalka PC

**Ardayga waxaa waajib ku ah in:**

• Waa in la hubiyaa in qalabka laga ilaaliyo waxyeelada iyo in la xado (tusaale ahaan lagu xafido khaanad la xiri karo,marka la soo qaadanayana boorso lagu rido,lana isticmaalo bac roob,boorso gacmeedna lagu qaado marka la safrayo).

• Cid kale ha amaahin kumbiyuutarka, meelna ha uga tegen iyada oon cidi ilaalinayn.

• Ha soo dejinina waxyaaba wax yeelan kara ama borogaamo kale.

• Waxba ha ka bedelin,hana koobiyayn borogaamada hore loogu diyaariyey kumbiyuutarka iyada oo aadan ogolaansho gaar ah ka haysan iskoolka.

• Ku hubi in aad soo koobi garaysid waxyaabaha la xiriira dhanka bed qabka.

• Ha ka tirtirin mashiinka calaamadaha(noocyada calaamadaha ah,nambarka wershedu ku samaysay iyo wixii la mid ah).

• Adigu wax calaamada ha ku samayn mashiinka ama waxyaabaha lagu dhejiyo.

Hadii looga shakiyo kumbiyuutarka vurus ama dhibaato kale ama la arko in si khalad ah loo isticmaalayo kumbiyuutarka waa la xirayaa koontada ardayga.Ardaygu waa in uu la xiriiraa xafiiska kumbiyuutarada si dib loogu soo dejiyo borogaraamada kumbiyuutarka.

Degmadu waxay xaq u leedahay inay isticmaasho software si ay ula socoto socodka shabakadaha iyo codsiyada ku jira kombayutarka oo kali ah xiliyada lagu guda jiro imtixaanada. Ujeeddadu waa in laga hortago qishka oo la ogeysiiyo wax ku saabsan software-ka aan la oggolayn ee ku jira PC-ga. Xuquuqdan kormeerku waxa ay ku kooban tahay xilliyada imtixaanada mana khusayso wax ka baxsan xilliyadan.

Isticmaalka waxaa nidaaminaya sharciyada maamulka gobolka ee dugsiyada sare.

**2.3. Adeega iyo garantiiga**

Ardayga waxaa waajib ku ah in uu kumiyuutarka u geeyo shaqaalaha farsamada kumbiyutarda si loo casriyeeyo,khaladaadka looga saxo lana hagaajyo.Hadii ardaygu isaga ama cid kale uu u ogolaado in ay hagaajiyaan kumbiyuutarka, saamayntu waxay noqon kartaa in uu garantiga la lumiyo.Taasi waxay keeni kartaa in ardaygu dhiibo mag-dhaw

Hadii loo baahdo iskoolku wuxuu ardayga siin karaa qalabka lagama maar-maanka ah.

Ardaygu waa inuu ka warbixiyaa arrimaha garantiga si joogto ah,ugu dambayn 20 juun sanad dugsiyeedka sadexaad kadib marka heshiiska la galay. Waxay kaloo khusaysa sidoo kale kumbiyuutarka la amaahday.

**2.4. Waxyeelid iyo lumin**

**Dhaawaca**

Dhamaan ciladaha qalabka iyo sidoo kale waxyeelada arna lumida waa in lagu war geliyaa iskoolka sida ugu dhakhsiiyaha badan ee ugu horaysa ugu danbayn 14 maalmood gudohood.

Ardaygu waa in aan isku deyin in uu isagu hagaajiyo waxyeelada, laakiin uu u daayaa iskoolka. Hagaajinta aay samayaan adeegyaal aan la ogolayn, waxay keeni kartaa in aan khasaarahaas la daboolin/labixn.

Hadii kumbiyuutarka  khasaaro ama waxyeelayo  waxaad dhiibayasaa qayb ka mid ah kharashka, qabybtaasuna way ka badnaan kartaa, waxayna ku xiran tahay hadba inta khasaaruhu le'eg yahay.

Haddii kombuyuutarku uu dhaawacmo ama uu lumo si taxadar la'aan ama ujeedo awgeed, ardaygu/mas'uulka waa inuu daboolaa hagaajinta ama bixiyaa qiimaha haraaga PC-ga iyadoo la raacayo tilmaamaha hadda jira ee gobolka/degmada.

Tusaale ahaan taxadar la'aantu  marxaladaha qaarkood  waxay noqon kartaa:

- Hadii si taxadr daro ah la isugula rido cabitaan/dareere iyo kumbiyuutarka isla boorsada.
- Aad ku isticmaasho meel aan loogu tala gelin (tusaale ahaaan meel u dhoow ciid,biyo qalabka alxanka ama mashiino kale oo dhaawici kara kubiyuutarka sida wershedaha iyo wixii la mid ah).
- Aad dhigto meel aadan adiga ama ardayda kale ilaalinayn.
- Hadii aad taxadar la'aan aad samayso marka aad gaadiidka la raacaysid
- Hadii waxyeelo ka soo gaarto meel aan haboonayn oo aad dhigtay darteed kumbiyuutarka oo aad adiga ama qof kale ku fariisto.
- Hadii aad dhigto meel si taxadar laa'an ah tusaale ahaan meel sare,dhulka ama meel koorna ah iwm.
- Hadii waxyeelo ka soo gaarto shay aad dhex gelisay kiiboorka iyo shaashada dhexdooda,tusaale ahaan xaashi aad isku dhejisey.

**Xadista /tuugada**

Hadii ay dhacdo in la xado ardaygu waa in uu si degdeg ah ugu war geliyaa boolska. Iskoolkuna waa in loo keenaa nuqul kam mid ah warbixinta xatooyada.

Hadii kumiyuutarka laga xado meel gaar ah ama meelaha la isgu yimaado oo ay ku jiraan iskoolka,waxaa ardayga iyo waalidku ka masuul yihiin in ay bixiyaan haduu lumo,tusaale ahaan ay isticmaalaan caymiskooda. Waxaanu ku talanaynaa caymiska tuugada/xadista.

**2.5 Xaq u yeelashada lahaanshaha qalabka**

**Guud ahaan ku saabsan la wareegida**

Si uu ardaygu u yeesho kumbiyuutarka waa in uu bixiyey kiradii sadexda sano ahayd.Uuna dhameeyey iskoolka. Kumbiyuutarka waa loo furayaa si uu u isticmaalo sida uu rabo.Shatiga Microsoft Windows waa ku jiraa kumbiyuutarka ,laakiin kuma jiro  shatiga Microsoft Office 365.Borogaraamada kale oo dhan waa laga tirtirayaa.

Hadii ardaygu raaci waayo tilmaamaha la wareegida lahaanshaha kumbiyuutarka,marka uu dhamaado xiirka uu la leeyahay iskoolka,gobolku wuxuu xaq u leeyahay in uu dib u rakibo

waxa ku jira kumbiyuutarka,iyada oo  wax digniin ah oo dheeraad ah la siinin.Tani waxay keeni kartaa in ay lumaan xog iyo waxyaabihuu uu ardayku ku kaydsaday.

**Ardayda la is weydaarsado**

Ardaygu wuu qaadan karaa kumbiyuutarka hadii ardaygu waxbarasho dalka dibadiisa u aadayo.Maqnaanshaha ka badan 6 bilood waa in loo samayaa qaab ku haboon oo uu ku istiticmaali karo si khaas ah.Ardaygu waa in uu  bixiyaa lacagta kaga harsan kirada, markaas buu ardaygu maamulan karaa kumbiyuutarka,uuna soo dejisan karaa borogaraamada uu u baahan yahay.Marka ardaygu ku soo noqdo iskoolka oo ay u soo dhamaato iswedaarashdii ardaydu waa in ardaygu la xiriiraa xafiiska kumbiyuutarada ee iskoolka, si ay ugu diyaariyaan si uu iskoolka ugu isticmaali karo.

**Bedelka iskoolka**

Hadii ardaygu uu u kala bedesho iskoolada degmada /dawlada, isla gobolka ardaygu wuu u qaadan karkaa kumbiyuutarka iskoolka cusub.

Hadii ardaygu u bedesho iskool gaar loo leeyahay ama kuwa dawli ah oo gobol kale ah,waa in ardaygu bixiyaa qaybta lacagta ah ee kaga dhiman kumbiyuutarka,iyada oo la raacayo xuquuqda xeer hoosaadka waxbarashada.Ardaygu wuxuu iskoolkka u soo celin karaa kumbiyuutarka,shuruudaka fiiri qabta xoo socota.

Ardayda oo dhami waa in ay la xiriiraan iskoolka cusub warbixinaha ku saabsan xeerarka khusaya kumbiyuutarka.

**Ka tegida iskoolka**

Hadii ardaygu ka tago iskoolka kowda oktoobar ka hor isla dayrtii heshiiska la galay, ardaygu xaq uma laha in uu qaato kumbiyuutarka,waana in iskoolka loo soo celiyaa.Hadii ardaygu ka tago kowda oktoobar ka dib oo aanu rabin in uu haysto kumbiyuutarka,waa in kirada harsan uu bixiyaa.Hadii ardaygu joojoyo koda oktoobar kadiib oo aanu rabin in uu haysto kumbiyuutarka,ardagu wuxuu bixinayaa kirada bilaabatay sanad dugsiyeedka.

**Sii wadashada waxbarashada,tusaale ahaan in aad sii dhisto dugsiga sare**

Ardagu wuxuu isticmaali karaa isla kumbiyuutarka uu la wareegey VG2/Vg3 marka uu waxbarashada sii wadanayo isla gobolka,waxay kaloo khusaysaa  hadii uu waxbarasha dheeraad ah qaadanayo.

Hadii ardaygu aanu isticmaali karin kumbiyuutarka hore loo siiyey,ardaygu wuxuu saxiixi karaa heshiis cusub oo uu ku amaahanayo kumbiyuutar oo uu kiraysanayo sanadkiiba.Waa in la soo celiyaa kumyuutarkan marka iskoolku dhamaado.

## 3. Amaahda agabka waxbarashada, buugaagta iyo agabka kale

Heshiiskani wuxuu khuseeyaa sannad dugsiyeedka oo dhan ee agabka waxbarashada, buugaagta iyo agabka kale.

Agabka ardagu amaahaday waa hantida iskoolka.

Hadaad iskoolka dhamayso.ama maado dhamayso.maado joojiso ama sanad dugsiyeedka joojiso waa in agabka waxbarashada oo dhan dib loogu soo celiyaa iskoolka. agabka waxbarasho ee aan la soo celin waqtigii lagu balamay waxaa loo arkayaa in aad lumiseen, waxaana boonada qaan sheegadka ee aad lacagta ku bixinaysaan loo soo dirayaa ardayga/waalidka. Qiimaha iibka dhabta ah baa laguu soo diri.

Buugaag kale iyo agabyo kale ayaa si joogto ah loo soo celinayaa,taas oo waafaqsan  sannad dugsiyeedka oo dhan iyadoo la raacayo go'aamada iyo xeerarka.

### 3.1 Sida loola dhaqmayo agabka laga soo amaahday adeegga maktabadda dugsiga

Dhammaan wixii la amaahaday waxaa lagu diiwaan gelinayaa nidaamka amaahinta maktabadda ee ardayga.

Waajibadka ardayga:

- in si mas'uuliyad leh loo maareeyo walxaha la amaahday si aysan u soo gaadhin jeexjeex iyo dhaawaca aan loo baahnayn
- in aadan isticmaalin wax calaamad ah, hoostana ka xarriiqin qoraalka, buugaagta la soo amaahdayna ha ku qorin qoraallo.
- in la ilaaliyo ku-daha/calaamada buuga.

### 3.2 Waxyeelo ama lumis

Haddii ay dhacdo khasaare, burbur ama burbur alaabta la amaahdo, ardayga/masuulka ardayga ayaa si buuxda mas'uul uga ah magdhowga.

Waxaa maktabada iskoolu ku soo xusuusinaysaa 2 jeer inta aan laguu soo dirin mag-dhoowga Waxaa amaahduhu masuul ka yahay in uu keeno cadaynta in uu agabkii keenay, waxaana cadaynta lagu diraa si otomaatik ah e-post. Xaalaka amaahashada, xusuusinta iyo warqada qaansheegadka waxaad ka heli kartaa sidoo kale Bogga aad ku Leedahay Maktabada.

Warbixino intaas ka badan oo ku saabsan qiimaha marka wax la lumiyo ama la waxyeelayo waxaad ka daalacan kartaa boggan:

https://vestfoldfylke.sharepoint.com/sites/innsida-varorganisasjon/Innsidafellesdokumenter/30928348584efeabd391080ca553a984-Satser%20for%20erstatning%20av%20skadet%20eller%20mistet%20utl%C3%A5nsmateriale%20fra%20skolebibliotekstjenesten.pdf?web=1

## 4. Saxiixa iyo lacag bixinta

Saxiixayga waxa aan ku xaqiijinayaa in aan akhriyay waxa ku qoran dukumeentigan. Saxeexayga, waxaan aqbalay shuruudaha iyo shuruudaha maamulka gobolka ee isticmaalka iyo maaraynta kombuyuutarrada iyo shuruudaha iyo habraaca isticmaalka iyo maaraynta agabka waxbarashada ee amaahda ah, buugaagta iyo agabka kale.

**Qaybta lacageed ee aad bixinayso kumbiyuutarka**

Ardaygu waa in uu bixiyaa kiro sanadle ah ilaa sadex sano,Ardaygu  hal mar buu hor marinayaa lacag bixinta,isaga oo ku bixinaya nidaamka elektaroonikada ah  ee gobolka. https://elevkontrakter.vestfoldfylke.no

Kiradu waxay u dhigantaa heerka ugu yar ee deeqda qalabka ee laga bixiyo sanduuqa waxbarashada ee dawliga ah,sanadkiiba mar baa wax laga bedelaa.

**Lacag bixinta hadii ay dhacdo lumin iyo waxyeelo/dhaawac**

Dalabka magdhowga ee waxyeelada iyo luminta PC, agabka waxbarashada, buugaagta iyo agabka kale, ama  ay maqan yihiin agabab la keeni lahaa marka loo fiiriyo  heshiiska, ardaygu wuxuu heli doonaa qaan sheegad.

Haddii ay dhacdo lacag-bixin la'aan, ardaygu wuxuu heli doonaa xusuusin la xiriirta in loo gudbinayo inkasso. Degmada ayaa laga yaabaa inay u wareejiso xaqa lacag-ururinta dhinac kale.

Ardayda da'doodu ka yar tahay 18 sano jir, mas'uulka u saxiixay baa ah kireystaha mas'uulna ka noqon doona wixii sheegasho ah ee lacag-bixin la'aan ah.

Vestfold fylkeskommune
Meesha iyo taariikhada: Tønsberg, august 2025

Liv Marit Hansen
Agaasime
Waxbarashada iyo caafimaadka ilkaha

Arday iyo waalid

| Meesha iyo taariikhda | Ka yar 18 sano saxiixa masuulka,waalidka: |
|---|---|
| Magaca ardyga (xarfo waaweyn) | Magaca waalidaka (xarfo waaweyn) |
| Saxiixa ardayga | Saxiixa waalidka |